



Waxey ku socotaa waalidiinta dugsiyada hoosedhexe ee degmada Norrköping

Salaan!

Sida aad dhamaantiin wada ogtihiin waxey bulshada ku jirtaa xaalad aad isbishal u ah. Maalmaha wey ka duwan yihiin sidoodi caadiga aheyd waxaana laga dareemayaa degmada Norrköping iyo dhamaan waddanka oo dhan iyo aduunka oo dhan. Degmada Norrköping waxey raaceysaa talooyinka qaran ee hey'adaha dowladda, si la mid ah degmooyinka kale ee gobolka ee Östergötland. Marka ey nolol maalmeedka isku beddelaan sida aan aragnay isbuucyadii ugu dambeeyay waxaa loo baahan yahay in isbedello qaarkood laga sameeyo iskuulladeenna, mararka qaarna in isbedelladaas si dhahsi ah loo sameeyo. Waxaan rajeyneynaa in adiga ka waali ahaan aad dulqaad ka sameyso xaaladda taagan. Waxaan rabnaa in aan kugu wargelinno fikirkeenna ku aaddan arrintaas iyo waxqabadyada laga sameeyay dugsiyada hoosedhexe ee degmada Norrköping.

Ardayda oo dhan waxey gaarayaan hadafkooda

Dugsiyada hoosedhexe waxa ugu weyn ee xoogga la saarayo waa in arday oo dhan ey gaaraan hadafkooda. Waqtiyadaan xattaa waa iney gaaraan. Waxaan ka shaqeynaa in aan wax walba oo macquul ah u sameyno si uu arday walba sida ugu macquulsan horumar u gaaro. Sidaas oo kale waxaan ka shaqeynaa in ey sinnaan wanaagsan jirto Samtidigt arbetar vi för en god likvärdighet – taas oo loola jeedo in fursadaha waxbarasho ee arday oo dhan iney isku mid yihiin.

Arrinta ku aaddan sinnanta waxaa mararka qaar loo arki karaa is bedel dhacay uu qeyb ka noqdo in ey wax sidii ey ahaayeen ka sii xumaadaan. Waan fahmeynaa haddii adiga ka waalid ahaan aad daremeyso in isbedellada qaar ey sidaas noqdaan. Waxaan ka duuleynaa waxa ey ardayda oo dhan dani ugu jirto hadafkeennana waa in isbedellada dhacaya ey keenaan in arday iyo carruur badan ey ka sii wanaagsadaan sida ey ahaayeen.

Qodobadaan soo socda kuligood waxey muhiim u yihiin go'aannadeenna ku aaddan waxqabad iyo isbedello:

- Hadaf gaarid wanaagsan oo arday walba ah iyadoo la kaashanayo casharro tayadoodu sarreyso iyo arday badan oo goobjoog ah
- Good shaqo xaalado shaqo oo u wanaagsan shaqaalaheenna
- Gacan ka geysasho in la yareeyo faafidda cudurka iyada oo laga duulayo talooyinka Hey'adda caafimaadka dadweynaha

Xaaladda hadda

Shaqaaale iyo arday badan ayaa iskuulka guriga ka joogto. Maqnaashaha iskuullada wuu kala duwan yahay. maalinba maalinka ku xiga. Taasna waxye ku xirantaahy talooyinka qaran ee dhahaya in qofka uu guriga joogo haddii uu isku arko xanuun yar, kuwaas oo sida caadiga ah aan guriga loo joogin.

haddii aad rabto inaad caawiso cunugaaga guriga joogo

ardayda guriga jooga oo qaba xanuunno yar sidooda kalana u firfircoon waxey casharrada kala socon karaan Google Classroom ama waxey ka shaqeyn karaan aalad waxbarasho oo dijitaal ah. Wuxuu cunugaaga sidaas ula socon karaa waxbarashada xattaa haddii uu guriga u joogo xanuunno yar awgood. Waxaan kaloo xattaa kugu boorrineynaa haddii ey carruur yar guriga kuu joogaan inaad waddaan akhriska.

isbedellada la sameeyay

waxaan rabnaa inaan kuu sharraxno qaar ka mid ah isbedellada aan si ku meel gaar ah u sameynay. Iskuullada iyo sanad dugsiyeedyada siyaabo kala duwan ayey isbedellada u ekaan karaan. Waxaa laga yaabaa in iskuulka uu cunugaaga dhigto iney isbedelladaas qaar ka mid ah ey saameeyeen. Waxaa laga yaabaa inaad dareentaan mustaqbalka.

Waxyaabaha aan bedelnay waxaa ka mid ah:

- **Macallimiin ku meel gaar ah ama macallimiin aan kuwa caadiga ah aheyn**
macallin aan ahyen macallinka uu cunugaaga u bartay ayaa cashar u dhigi kara. Waxey taasi ku dhacday maadaama maqnaashaha shaqaalaha uu aad u batay marka loo barbar dhigo sida caadiga ah. Maamulaha iskuulka waxaa dhici karta inuu isku shaandheyn ku sameeyo shaqaalaha si sida ugu macquulsan ey xisooyinka u dhigaan macallimiinta aqoonta gaarka ah u leh. Xafiiska waxbarashada ayaa garab ka geysta in in macallimiin ku meel agaar ah ey wax ka dhigaan goobaha ey baahiyada ka jiraan. Waxey noqon karaan shaqaale kale oo waxbaridda ka shaqeeya ama arday macallinimo barta. Kulligood waa shaqaale ku meel gaar ah oo la ansixiyay waxeyna caddeyn warqadda diiwaanka dembiyada kala yimaadeen booliska, taas oo wax la sameeyo marka xarumaheenna laga shaqeynayo.
- **Guruubyo waxbarasho oo isbedelay**
cunugaaga wuxuu xiso la qaadna karaa guruub aan aheyn guruubkiisa caadiga ah. Waana qaab uu iskuulka ama maamulaha uu habeeyo waxbarashada marka ey macallimiin ama arday badan ey maqan yihiin.
- **Waxbarasho good kale lagu dhigto**
waxaa laga yaabaa in cunugaaga uu xiso ku qaato iskuul kale arday kale oo iskuullo kale dhigtana la dhigto. Taas hadda waa la badalay. Si loo yareeyo faafidda cudurka waxaa xisadaha lagu dhigayaa iskuulka uu cunuga dhigto. Waxaa dhici karta in jadwalka wax laga badalo ama baabuurka iskuulka waqtiyadiisa wax laga bedelo. Waxaa xattaa teeramkaan oo dhan la xiray casharrada dabaasha ee lagu qaban jiray Centralbadet. Ardayda ey quseeyso gadaal dambe ayaa la siin doonaa casharrada dabaasha.
- **Joogid ioy maqnaasho**
waxaan raaceynaa talooyinka Hey'adda caafimaadka dadka waxaana rabnaa in ardayda xanuunsan oo dhan in ey guriga joogaan. Xattaa haddii carruurta ey qabaan calaamado hergab oo fudud sida diif. Haddii ey carruurta caafimaad qabaan iskuulka ayey imaanayaan waxeyna qaadanayaan waxbarashadooda.

- **Waxbarasho masaafeed**

Ma jiraan talooyin qaran oo ku saabsan waxbarasho masaafeed quseeya dugsiga hoosedhexe mana ogin haddii ey iman doonaan. Laakiin xafiiska waxbarashada iyo iskuullada waxaan isku diyaarineynaa in ey xisooyinka waxbarasho masaafu ahan laga dhigo haddii ey yimaadaan talooyin ku saabsan waxbarasho masaafeed quseysa dugsiyada hoosedhexe.

Hadda xisooyinka iyo waxbarashada caadiga ah ee iskuulladeenna sidooda ayey u socdaan. Waxaa nasoo gaara su'aalo badan oo ku saabsan in la sameyn karo waxbarasho masaafeed barbar socota waxbarashada kale ee caadiga ah. Arrintaas suurto gal maaha hadda maadaama ey shaqaale badan maqan yihiin. Haddii shaqaalaha tahay in ey ku filnaadaan waxbarashada waxey waxbarashada ku qaban karaan hal meel oo kaliya waana iskuulka.

- **Caafimaadka ardayda**

Xarunta caafimaadka ardayga waxey u shaqeyneysaa sidii caadiga aheyd waana la xiriiri karaa. Shaqaalaha wey joogaan, laakiin haddii mid ka mid ah shaqaalaha uu xanuunsan yahay waxaa dhici karta in kulamada ballansanaay dib loo dhigo. Haddii ey sidaas noqoto adiga waalidka ah ayaa lala soo xiriirayaa.

- **Hoolka cuntada iyo isboortis**

Talooyinka qaran waxey sheegayaan in aan ka foajignaanno iney arday badan isku meel isugu yimaadaan. Taasina waxey keeneysaa in aan tusaale ahaan nidaam cusub u sameyno hoolka cuntada ama in waqtiyada la bedelo si ey ardayda isku mar wax cunta ey u yaraadaan. Xisadaha isboortiska waxbaa laga bedelayaa. Badalka jimicsiga jirka ee uu jirka istaabanayo waxey ardayda sameeynayaan waxyaabo kale.

- **Nadaafadda**

Si qeyb looga geysto yareenta faafidda cudurka waxaa lokaalladeenna la hagaajiyaa in ka badan sida caadiga ah, tusaale ahaan musqulaha, gaanjooginka albaabyada, meelaha nalalka laga daaro/demiyo iyo meelo kale oo xasaasi ah.

Bogga internetka ee degmada waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah oo adiga ka waali ahaan loogu tala galay. Si joogto ah ayaa loo abdhceyt gareeyaa bogga. Warbixin waxaad kaloo ka heleysaa bogga internetka ee Hey'adda iskuullada (Skolverket)

www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola.html

www.skolverket.se/for-dig-som-ar.../elev-eller-foralder

Waan kaaga mahadcelineynaa inaad fahansantahay in waxbarashada carruurtaada uu isbedel ku dhici karo hadda, in aad ku taageertid shaqaalaheenna shaqadooda ku aaddan in ey inta karaankooda ah sameeyaan si arday walba uu u helo fursad uu ku najaxo waxaana kaloo kaaga mahadcelineynaa kaalintaada firfircoon ee aad ka geysaneysid waxbarashada cunugaaga.

Salaan

Sofie Lindén

Daaregterka waxbarashada
degmada Norrköping